

Coronavirus iyo Is ceebaynta/Dhaleecaynta



Coronavirus ma aqoonsana jinsiyad, dhalasho, ama qowmiyad.

Cudurka aan hore loo arag ee novel coronavirus wuxuu 2019-kii ka bilaabmay Wuhan, China. Kaasi waa juqraafi ahaan kaliya. Lahaanshaha qof abtirsiinyo/asal ahaan ah Shiine – ama abtirsiinyo/asal kasta oo kale leh – kama dhigeysa qofka mid aad ugu nugul cudurkan.



Xirashada maaskare macnaheedu ma aha in qofku jiran yahay.

Dadku waxay maaskaraha u xirtaan sababo kala duwan, oo ay ka mid tahay si ay iskaga ilaaliyaan waxyaabaha ubaxa ka soo hara 'pollen' iyo hawada wasakheysan iyo sababo dhaqan iyo bulsho ahaaneed. Ma aha in aanu iska xukuno qof xirnaanshaha uu xiran maaskare ama iskaga qaadano in uu jiran yahay.



Waad joojin kartaa is ceebaynta/dhaleecaynta. Ka bilaw adiga oo wadaagaya macmuulaad sax ah.

Iska ilaali faafinta macluumaadka qaldan. La soco waxa jira iyada oo la adeegsanayo ile sumcad leh, oo la aaminsan yahay.

- Xarumaha la Dagaalanka iyo ka Hortagga Cudurka
- Website-ka Maamulka Caafimaadka Oregon ee COVID-19



Hadal haddii aad maqasho, aragto, ama akhrido macluumaad qaldan ama dhibaateyn.

Si tartiib ah u sax macluumaadka beenta ah, isla markaana xasuusi qofka hadlaya: luqadda nacaybku ku jiro iyo ficillada dhammaanteen inaga dhiga kuwo aan haysta ammaan aan badnayn. Haddii ay dhibaateyn daran dhacdo, tixgeli in aad soo sheegto.



Naxariis iyo taageero u muuji kuwo ay inta badan si dhow u saameysay.

Dhageyso si aad u qirto oo adiga oo haysta oggolaansho, la wadaag sheekooyinka dadka ka kulmaya ceebayn/dhaleecayn, oo ay weheliso farriin ah in nacaybku uu yahay wax aan la aqbali karin bulshadaada dhexdeeda.

Raadi meelaha laga sii gelayo 'links' ilaha ku saabsan COVID-19 OWL

<https://www.oregon.gov/DHS/Pages/COVID-19-Communications-Toolkit.aspx>